



NEIGHBOURHOOD
Empowerment Team

KA HORTAGGA DANBIYADA iyadoo loo marayo qaab Deegan

Hagid deg deg ah oo wax ku ool ah kuna aadan tallaabooyinka ay qaadi karaan reer
Edmonton si ay hantidooda uga dhigaan mid ammaan ah.



KA HORTAGGA DENBIGA IYADOO LOO MARAAYO QAAB DEEGAAN



Danbiyada hantida sida **xadidda baabuurta** ama in wax laga xado **agagaarka guryaha la daganyahay** ayaa inta badan ah danbiyo fursadeed.

CPTED waa hab la hubiyey si loo yareeyo dembiyada dhabta ah iyo cabsida dembiga iyadoo la bedelayo deegaanka. Iyadoo si horseednimo ah loo dabaqayo mabaadi'da CPTED waxa aan kordhin karnaa badbaadinta hantideenna iyo middeenna bulsho.

Qaabaynta iyo maaraynta goob bannaan waxay saamaysaa hab-dhaqanka aadanaha. Marka goobta bannaan si fiican loo qaabeeyo waxay wax ka tartaa yaraynta dambiyada sidoo kalena kordhisaa aragtida laga qabo ammaanka. Si kastaba ha ahaatee, marka meel bannaan si liidata loo qaabeeyo waxay ubadantahay in dambiyo iyo dhaqanka bulshada lidka ku ah ay ka dhacaan. Tani kaliya ma saamayso badbaadadeenna iyo rabitaankeenna in aan ku dhexjirno ama qayb ka ahaanno bulshadeenna, balse waxay kaloo saamaynaysaa fayo-qabkeenna guud.

Mulkiilayaasha guriyuhu waxay qaadi karaan tallaabooyin firfircoon si ay u ilaashadaan hantidooda iyagoo fulinaya Xeeladaha xoojinta bartilmaameedka. Istaraatiijiyadahani waxay raacaan mabaadi'da CPTED (Ka hortaga denbiga iyadoo loo maraayo Qaab deegaan) lana raadiyo in loo qaabeeyo deegaanka qaab ka caawinaya ka hortagga dembiyada. Qaabka wanaagsani waxuu kordhiyaa fursadaha lagu qabankaro danbiilaha, wuxuuna yareeyaa faa'iidooyinka dembiga. Waxay kaloo inaga dhigta inaan dareeno ammaan badan iyo nafis.

Istaraatiijiyadaha CPTED ayaa si wacan oo wadajir u wada shaqeeya, sidaa darteed iyadoo la fulinaaayo tiro tabo ah oo ku dhigan dhukumeentigan hantiilayaashu waxay kordhin karaan badbaadada hantidooda.



KOR-JOOGTAYN



Dareenka **aragga** iyo **in la arko**.

Waxuu inoo ogolaadaa **inaan saadaalinno deegaankeena** taasoo inaga dhigaysa inaan dareeno nafis badan.

Goobaha bannaan waa in loo nashqadeeyo **meelo si fiican oo waadax ah wax looga arki karo** iyada oo maanka lagu hayo privacy-ga ama sirta. **meelaha geeri go'anka** ah ama **qarsoon** waa in laga fogaadaa.



Xun



Wanaagsan



Iftiintu waa qalab qiimo leh oo awood siinaya Ilaalinta waana in loo qaabeeyaa si looga hortago dhalaalka iyo hadhka/harka. Joogteyntu waa muhiim, sidaa darteed, xaaladaha iftiinka sareeya iyo kan hooseeya waa in laga fogaado maadaama tani ay saameyneyso aragga habeenkii



Kaamaradaha, Alaarmiga, Muraayadaha iyo dareemayaasha dhaq-dhaqaaqa ayaa kaa caawin kara inaad la socoto ama daawato meelaha laga yaabo inay aad u nugul yihiin.

KOR-JOOGTAYN



KOR-JOOGTEYN TA DABIICIGA AH

Dadku waxay awoodaan inay kormeer ama indha-indhayn sameeyaan marka ay marayaan gudaha iyo agagaarka meelaha bannaan.

Dadka ag maraya guriga waxay awoodaan inay indha-indheeyaan oo warbixin ka gudbiyaan dhaqdhaqaaqyada shakiga leh.

Qalabka dhismaha, qurxinta dhulka, deyrka iyo darbiyada waxaa loo qaabayn karaa qaab dabiici ah oo u furan kormeeridda dabeeciga ah. Korjoogteynta. Xeerka caadiga ah ee qaabaynta dhulku waa in **kaynta hoos loo jaro** ilaa 0.6 mitir (2 cagood) lana qorqoro **laamaha hoose** ee geedaha ilaa 1.8 mitir (6 cagood) si ay u furto aragga.



Ilaalada gaafwareega iyo barnaamijyada sida kuwa ilaalinta jaarka/dariska ayaa bixin kara indha-indhayn qiimo leh bulshadana tusi kara inay ka qaybqaateen.

Bulshooyinku waxay ka faa'iidaystaan kor-joogtaynta ay bixiyaan isticmaalka dhulka isku dhafan (ganacsiga shaqeeya inta lagu jiro maalinnta marka ay dadku ka maqan yihiin guriga) iyo in laga helo waxqabad abuurayaal sida garoomo u dhow.


KOR-JOOGTAYMAHA KALE

HAYSASHADA KONTAROOOLKA DABIICIGA AH

Qaabaynta dhulka iyo dhisidda nashqado ay ku jiraan meelaha la maro, dhirta iyo meelaha dhulka korkiisa ah ee kala duwan.



HAYSASHADA KONTAROOOLKA DABIICIGA AH



Xakamee sida ay dadku usoo geli karaan ama uga bixi karaan guriga.



ka saar dariiqyada/wadooyinka ay suura gal tahay in laga baxsado, ilaali meelaha nugul sidoo kale tus ama tilmaan meelaha loogu tala galay inay dadku joogaan.



Way fududahay in la ogaado dadka aanay ahayn inay joogaan meel kasta haddii aan **si cad u qeexno waddooyinka lamarayo.**



WAXYAABAA KALE EE LAGU KANTAROOLO

Dayrka iyo albaabadu waxay ka hortagaan gelitaanka isticmaalayaasha aan loogu tala galin.

Kuwani waxay sameeyaan xayndaab oo marka si fiican loo dhiso waxay kor u qaadi karaan amniga iyo sidoo kale meel furan oo wax laga arki karo.

kaararka albaabada la mariyo/lagu furo ama hababka qufullada iyo sidoo kale meelaha soo dhaweyntu waa inay xaqiijiyaan in kaliya shaqsiyaadka haysta ogalaanshaha inay galaan meelaha private-ka ama sida gaarka ah loo leeyahay



DHULKA



Hanti si wanaagsan loo dayactiray waxa ay diraysaa fariin ah in aagga la kormeeray lana daryeelay, sidaas darteed dembiilaha kartida leh way yar tahay inuu dembi ka fuliyo halkaas.

WAXYAABAHA DIFAACA LEH

Si cad u qeex **xuduudaha** iyo xayndaabka hantidaa/gurigaaga.

Kala guurka meesha Publiga ah iyo meesha private ka ah waa inay caddahay.



Kadib



Kadib

DAYACTIRKA

Hantida sida wanaagsan loo dayactiray waxay muujinaysaa qanaaco, dareen lahaanshiyo iyo dulqaad la'aanta hab dhaqanka aan loo baahnayn.

Guryaha sii xumaanaya waxay muujinayaan inay yartahay xakamaynta isticmaalayaasha loogu talagalay iyo sida wayn ee ay ugu nugulyihiin danbiyada.





Agagaarka Hantidaada/gurigaaga

bogga
7




Daaqadaha

bogga
8



Albaabada

bogga
9




Geerashka

bogga
10



Shed

bogga
11



AGAGAARKA HANTIDAADA

Hubi inay **si cad u muuqdaan** dhammaan marinada laga soo galo ee wadada, **lagana jaray geedaha** iyo inay leeyihiin **laydh iftiimaya**. Tani waxay u ogolaanaysaa xubnaha kale ee bulshada inay arkaan dadka ay ka shakiyaan ee xayndaabkaaga taasoo siyaadinaysa khatarta soo galaha la dareemayo



U qaabee gurigaaga si looga aqoonsado guryaha kale ee dadwaynaha iyo qaab booqdayaasha ku jhayn kara marinda ku habboon ee laga galo

si joogta ah u dayac tir una nidaami guriga. Tani waxay tusaysaa fariinta ah inaad danaynayso hantidaada aadna qaadayso masuuliyadeeda, tani waxay sidoo kale siinaysaa tuugada guriga soo gasha inay yaraato meelaha ay ku dhuuman karaan.



Si Fiican U Iftiimi
Dariiq galitaanka
Entryway



laydhkiisu diciifka yahay



Ciwaankaaga sifican u calaamadi hana lahaado iftiin sax ah, tani waxay u sahlayaa baabuurta gurmada inay arkaan address kaaga. Haddii aad leedahay dariiq danbe ama wado danbe ku calaamadi address-kaaga sidoo kale ciwaanka. Haddii aad leedahay dariiq dambe, ku calaamadee meeshaas sidoo kale.



Haka tagin daaqadahoo furan marka aanad guriga joogin, waa loo soo dhici karaa xataa **tuuguu wuxuu kasoo gali karaa daaqadaha fooqa labaad.**

DAAQADAH



Haddii daaqadahaagu leeyihiin quful, isticmaal. Haddii kale, **ku rakib biin ama isticmaal gabol alwaax ah si aad uga hortagto simbiriraxashada daaqada iyo albaabka ee intuu siliteeyo furmayo.**

Ku xir biro adag, laakiin xaqiiji in **si fudud loo saari karo haddii dab kaco**. Daaqadaha qaybta hoose ayaa si gaar ah ugu nugul in lajabiyo.




Alwaax adag oo adkaysi leh ama shabaq bir ah ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa **in lagu dahaaro daaqadaha** si kor loogu qaado ammarka.




kalaxidh



Shabag bir ah



dahaadh balaastik ah



si aad alaabtaada qaaliga ah uqariso daaha shabaga ee looyaqaan(**Close blinds**) ku xidh marka aad guriga ka maqantey laakiin fur marka aad joogto si ay fariin u dirto ah in qof joogo.



Hubi in albaabada dibbaddu leeyihiin **adkaysi xooggan**.

ALBAABADA

Ku **xir handaraab bir ah** agagaarka albaabkaaga iyo meel uu galo oo god ah.



Gadkaas ama meesha uu galo furuhu waa inuu lahaa daa **dhumuc** ugu yaraan ah **hal inch ah**. Tani waa qaybta qaabanaysa albaabka iyo farme-kiisa.



Muraayadaha albaaba iyo birta albaabka qabata waa inay ugu yaraan noqdaan **3 inch**.

Xaqiiji in Albaabka Garaashka ee kore **uu gabi ahaanba xidhanyahay** kahor inta aadan guriga aadin.




GEERASH



Haddii geerashkaagu uu ku dheggan yahay gurigaaga, hubi **in albaabka geerashka laga soo galo uu yahay mid adag oo leh quful gudaha ah oo aad xidho**. Haddii kale qofbaa soo gali kara gurigaaga ka dib marka uu jabiyo geerashkaaga.

Isticmaal **waxyaabaha qarabaya daaqaadaha** si aad u qariso hantida qiimaha leh.



Haddi garaashkaagu aanu ku dhegganayn gurigaaga, **iska hubi in uu ilays sax ah kuxidhanyahay agagaarka**.


Albaabada laga soo galo geerashka waa in loo **isticmaalo xeelado la mid ah sida kuwa qufulka guriga iyo boolasha**.



Ha uga tagin furaha albaabka otomaatiga ee garaashka gudaha gaadhigaaga marka aad gaadhiga dhigto bannaanka. Haddii gaarigaaga la jabsado, furaha waxaa loo isticmaali karaa gelitaanka garaashkaaga.

Markaad fasax u baxdo, dami furaha albaabka garaashka.

Garaashka dusha sare ee albaabka inta dibadda laga soo galo ayaa la jiidi karaa si loo galo. Dhowr Habab ayaa laga heli karaa internetka oo muujinaya sida





Hantida kuu taalla daartaada waxay noqon kartaa mid **aad u qiimo badan**




DAARADDA GURYAHA



Hubi in daaradda guryaraha qufulku ku filan yahay **oo ay adag tahay in la jabiyo.**

Quful dibadda: sida ugu fiican ee loo isticmaalo waa quful kayd ahaana.

Daaqadaha waa **in la daboolaa** si loo qariyo waxyaabaha qiimaha leh ee ku xareysan Guri-yaraha daarada .



Hareeraha daashkaaga ama gurigaaga **waa inuu lahaa daa laydh/iftiin, albaabkuna waa inuu noqdaa mid adag.**



Dhammaan **hantida iyo lambarrada taxanaha ah** waa in la **diiwaangeliyaa.**



NEIGHBOURHOOD

Empowerment Team

Qaybta ka hortagga dambiyada ee adeegga booliska ee Edmonton waxay aqoon is-waydaarsi siisaa CPTED saraakiisha fulinta sharciga iyo xubnaha dad waynaha.

edmontonpolice.ca | 780-421-3422

Wixii macluumaad ah oo dheeri ah oo ku saabsan hagahaan fadlan kala xiriir

NET@edmonton.ca

NET waa iskaashi u dhexeeya adeegga police-ka Edmonton, Magaalada Edmonton, Family Centre iyo United Way of Alberta Capital Region.

Xilliga la daabacay hagaha: Winter 2019 | Somali